Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

**Ref:MOF/OM/0090/23** **December 9, 2023**

## Xeer-nidaamiyaha Maamulka Dakhliga ee Jihaynta Doorka Ciidanka Tributariyada ee Booliska Soomaaliyeed

## WASIIRKA MAALIYADDA EE DOWLADDA FEDERAALKA

**Markuu Arkay:** Qodobka 6(1)(c) ee Sharciga Maamulka Dakhliga 2019, oo awood u siinaya Wasiirka Maaliyadda in uu soo saaro Xeer-nidaamiyeyaal loogu talagalay in lagu horumariyo dhaqangelinta shuruucda dakhliga, iyadoo la fasirayo mabaa'diida, ahdaafta iyo qodobbada Sharciga Maamulka Dakhliga;

**Markuu Arkay:** Farqiga u dhexeeya qaabka ay u shaqeyan Ciidanka Tributariyada iyo qaab-dhismeedka sharci oo ay dejiyeen Sharuucda kala ah midka Maamulka Dakhliga, 2019 iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019;

**Markuu Garwaaqsaday:** Baahida loo qabo in la soo saaro Xeer-nidaamiye lagu jihaynaayo doorka Ciidanka Tributariyada uu ku leeyahay maamulka nidaamka dakhliga Dalka;

**Markaan Dhagaystay:** Talooyinka Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda iyo Agaasimaha Guud ee Dakhliga;

Wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan:

## QAYBTA 1-AAD
## QODOBADDA GUUD

### Qodobka 1-aad
### Magaca iyo Ujeeddada

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa Xeer-nidaamiyaha Maamulka Dakhliga ee Jihaynta Doorka Ciidanka Tributariyada ee Booliska Soomaaliyeed.

2. Si waafaqsan Qodobka 6(1)(c) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, ujeedada Xeer-nidaamiyahaani waa jihanyta iyo casriyaynta doorka Ciidanka Tributariyada uu ku leeyahay maamulka nidaamka dakhliga Dalka iyadoo la fasirayo mabaadi'da, iyo ujeedooyinka Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019.

### Qodobka 2-aad
### Qeexid/Erey bixin

1. Ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:

(b) **"Agaasimaha Guud ee Dakhliga":** Waxa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee loo magacaabay inuu hoggaamiyo Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda.

(t) **"Sarkaal Ciidanka Tributariyada ee Booliska Soomaaliyeed":** Waxaa loola jeedaa sarkaal katirsan Ciidanka Tributariyada ee Booliska Soomaaliyeed oo lagu dhisay Qodobka 18(1)(d)(i) ee Sharciga Dhismaha Ciidanka Booliska, 1972, kuwaa oo halkaan loogu xilsaaray inay Wasaaradda Maaliyadda ka caawiyan baarista iyo xakamaynta dambiyada ka dhanka ah Shuruucda Dakhliga.

(j) **"Sarkaal Dakhli":** Waxaa loola jeedaa sarkaal ka tirsan Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda, oo ay ku jiraan, balse aan ku ekeyn, saraakiisha canshuuraha berriga iyo kuwa furdooyinka.

(x) **"La taliyaha Sharciga":** Waxaa loola jeedaa sarkaalka maamula Qaybta Sharciga ee Wasaaradda Maaliyadda.

(kh) **"Hagaha Habraaca Qabashada Hawlaha Maareynta Maaliyadda Guud"** waxaa loola jeeda Hage dhaqan-galka ah ee uu soo saaray Wasiirka Maaliyadda oo qeexaya siyaasadaha guud, habraacyada, iyo nidaamyada la raacayo marka la maamulaayo maaliyadda guud.

(d) **"Agaasinka Guud ee Dakhliga":** Waxaa loola jeedaa Agaasinka u qaabilsan arrimaha maamulka dakhliga Wasaaradda Maaliyadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

2. Erey kasta oo aan lagu qeexin Xeer-nidaamiyahaan laakiin lagu qeexay Sharciga Maamulka Dakhliga ama shuruucda kale ee maaliyadda wuxu yeelanaya macnaha lagu siiyay shuruucdaas.

### Qodobka 3-aad
### U-hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyaha iyo La-socodka dhaqangelintiisa

1. Si waafaqsan Qodobka 6(4) ee Sharciga Maamulka Dakhliga 2019, saraakiisha dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda iyo kuwa Ciidanka Tributariyada ee Booliska Soomaaliyeed waxaa ku waajib ah inay u-hoggaansamaan Xeer-nidaamiyahan mar kasta oo ay gudanayaan waajibaadkooda ku aadan dhaqangelinta shuruucda dakhliga.

2. Si waafaqsan Qodobka 6(4) ee Sharciga Maamulka Dakhliga 2019, u hoggaansami la'aanta Qodobbada Xeer-nidaamiyahan waxa ay ka dhigan tahay u hoggaansami la'aanta Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, iyadoo saraakiisha ku xad-gudubta loo ciqaabi doono si waafaqsan Qodobbada (90)(b) iyo 93-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019.

3. Agaasimaha Guud ee Dakhliga waxa loo igmaday in uu si buuxda u kormeero dhaqan gelinta Xeer-nidaamiyahan. Inta uu ku guda jiro kormeerkiisa, haddii uu ka warhelo fal xadgudub ah oo ka dhan ah Xeer-nidaamiyaha oo ay ku kaceen saraakiisha Xeer-nidaamiyahan lagu dabaqaayo, Agaasimuhu waxa uu farayaa La-taliyaha Sharciga ee Wasaaradda inuu warbixin ku saabsan xad-gudbka diyaarsho, una gudbiyo Xeer Ilaaliyaha awoodda u leh. Iyadoo laga duulayo Qodobka 101 ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, La-taliyaha Sharciga waxaa loo tixgalinayaa inuu yahay Sarkaal Dakhli kaasoo maxkamad hor imaan kara isagoo wakiil ka ah Wasaaradda Maaliyadda.

## QAYBTA 2-AAD
## DOORKA WASAARADDA MAALIYADA

### Qodobka 4-aad
### Ku uruurinta Dakhliga Dowladda Khasnadda Mideysan oo kaliya

1. Sida ku cad Qodobka 4(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, dhammaan dakhliga Dawladda waa in lagu shubaa oo keliya Khasnadda Mideysan ee Qaranka (Treasury Single Account), si loo hubiyo in si hufan oo wax ku ool ah loo maareeyo dakhli ururinta.

2. Sida waafaqsan Qodobka 70-aad ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud, 2022, Khasnadda Mideysan ee Qaranka waxay ka kooban tahay Khasnada Guud (Treasury Main Account) oo ka furan Bankiga Dhexe iyo kontooyinka dakhli ururinta ku meel gaarka ah ee ka furan bankiyada ganacsiga. Sida lagu sheegay Qodobka 8(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, Wasiirka Maaliyadda oo keliya ayaa masuul ka ah maareynta Sanduuqa Mideysan, lacagaha Dawladda iyo xisaabaadka dhammaan caddeymaha dakhliga la qabtay.

3. Ma jirto hay'ad kale oo Dowli ah oo aan ahayn Wasaaradda Maaliyadda oo awood u leh inay maamusho Khasnadda Mideysan ee Qaranka.

### Qodobka 5-aad
### Habka dakhli ururinta

1. Sida ku cad Qodobka 4(3) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, Dakhliga Dawladda Federaalka waxa ku jira, balse kuma eka, dhammaan lacagaha ka yimaada ilaha soo socda:



Bthy

(b) Dhammaan noocyada kala duwan ee canshuuraha;

(t) Dhammaan Khidmadaha Dowladda ee sharcigu waajibinayo; iyo

(j) Ganaaxyada kala duwan (fines); ciqaabaha (penalties), la wareegidda (forfeits) iyo waayitaanka lacag hormaris ah.

2. Si waafaqsan Qodobka 6.1.1 ee Hagaha Habraaca Qabashada Hawlaha Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, Saraakisha Cashuuraha Berriga ee Agaasinka Guud ee Dakhliga ayaa u xilsaaran yihiin qiimaynta cashuuraha lagu leeyahay cashuur bixiyayaasha, halka saraakisha Xafiiska Xisaabiyaha Guudna ay u xil saaranyihiin inay soo saaraan foojarrada dakhliga. Dhammaan dakhliga Dowladda waa in si toos ah loogu ururiyo Khasnadda Mideysan. Waxa reebban in saraakiisha dakhliga ee Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyaddu ay qabtan lacag caddaan ah.

3. Iyadoo la raacayo Qodobka 6.1.2 ee Hagaha Habraaca Qabashada Hawlaha Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, dakhliga furdooyinka waa in la ururiyaa ka dib marka la xaqiijiyo badeecadaha la soo dejiyay iyo qiimaynta cashuuraha la bixinayo. Soodejiyuhu waa inuu dekadda badeecada laga soo dejiyay keena dukumeentiyada soo dejinta si uu u bilaabo hawsha canshuur bixinta. Marka ay saraakiisha furdooyinku xaqiijiyaan badeecada iyagoo ku salaynaya dukumentiyada, soodejiyaha wuxuu cashuurta furdooyinka si toos ah ugu shubaya Khasnadda Mideysan, ka dib marka uu qiimeeyo sarkaalka qiimaynta ee furdada.

4. Ma jirto hay'ad Dawladeed oo aan ahayn Wasaaradda Maaliyadda oo awood u leh inay ururiso dakhliga Dawladda ee ku qeexan Qodobka 4-aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019.

## Qodobka 6-aad
## Kormeerka

1. Si loo hirgeliyo Qodobka 25-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Saraakisha Dakhliga ee uu si qoraal ahaan ugu xilsaaray Agaasimaha Guud ee Dakhliga, waxa ay awood uleeyihiin in ay galaan xilliga saacadaha caadiga ah ee shaqada, goob kasta oo ganacsi oo ay kujiran goobaha warshadaha, kuwa ganacsiga, kuwa adeegyada xirfadeed, ama meel kasta oo kale oo ku guda jirta hawlo ganacsi, si'ay u hubiyaan in ay haysato Shahaadada Cashuurta Bixinta.

2. Inta uu kormeerka socdo, haddii uu sarkaalka dakhligu ogaado cid aan u hoggaansaneen Qodobka 25-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, waxa u isla markaas ku wargelinayaa inay muddo 12 saacadood gudahood ah ku hor yimaadaan xafiiska awoodda u leh ee Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda. Cid kasta oo aan bixin canshuurta Dowladd waxa lagu qaadaya Qodobka 91-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, ama sida ay dhigayaan Xeer-nidaamiyasha Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019.

3. Saraakiisha Dakhliga ee loo xilsaaray inay fuliyaan kormeerka waa inay si joogto ah uga sameeyaan goobaha (zones) ay mas'uulka ka yihiin kormeero nidaamsan oo guud iyo kuwa lama filaan ah (random), si loo hubiyo bixinta cashuuraha Dawladda.

4. Cid kasta oo Saraakisha Dakhliga inta ay ku guda jiraan waajibaadkooda ay ka dalbadaan in ay soo saarto Shahaadada Cashuur Bixinta, balse u hoggaansami wayda dalabkaas waxa lagu ciqaabayaa sida uu dhigayo Qodobka 91-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, ama Xeer-nidaamiyaashiisa.

## Qodobka 7-aad
## Ganaax u-beddelidda ciqaabaha dembiyada (Compounding of criminal offenses)

1. Marka ay Wasaaradda Maaliyaddu ganaax u-beddesho ciqaabaha dembiyada si waafaqsan Qodobka 97(3) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, cidda falkaas gashay laguma oogi doono wax dacwad ee la xiriirta fal dembiyeedkaas, sida kucad Qodobka 97(4) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019.

2. Agaasimaha Guud ee Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda ayaa leh awoodda ganaax u-beddellida ciqaabaha fal dembiyeedka. Si looga faa'ideysto waqtiga hey'adaha Dowladda, Wasaaradda Maaliyaddu waxay ganaax u-beddeli kartaa ciqaabaha dembiyada ka hor inta aysan bilaaban dhageysiga maxkamadda awoodda u leh dacwadda ka dhanka cidda falka gashay.

3. Marka ay ganaax u-beddesho ciqaabaha fal dembiyeed sida ku cad Qodobka 97(3) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Wasaaradda Maaliyaddu waa in ay si aan daahis laheen ula wadaagtaa Tributariyada iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, nuqul ka mid ah go'aanka Wasaaradda ee ganaaxa u-beddelay ciqaabaha fal dembiyeedka.

## Qodobka 8-aad
## Awoodaha gaarka u ah Wasaaradda Maaliyadda

1. Iyadoo la tixraacayo ujeedooyinka Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Wasaaradda Maaliyadda oo kaliya ayaa awood u leh:

(b) **Baarista cashuuraha (Tax Audit).** Awooda fulinta baarista cashuuraha waxa ay ka kooban tahay dib u eegis iyo baaris ku sameeynta xisaabaadka iyo macluumaadka maaliyadeed ee canshuur bixiye, si loo hubiyo in canshuur bixiyuhu macluumaadka si sax ah oo waafaqsan shuruucda cashuuraha usoo gudbiyay iyo in la xaqiijiyo in cadadka cashuurta ee la bixinaayo ay tahay mid sax ah. Sida ku cad Qodobka 47 (1) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Wasaaradda Maaliyadda oo keliya ayaa samayn karta baaris cashuureed.

(t) **Qiimaynta cashuuraha lagu leeyahay cashuur bixiye (Assess tax liability).** Awoodda qiimaynta cashuuraha waxay ka kooban tahay awoodda go'aan ka gaarista cashuurta lagu leeyahay cashuur bixiye. Si waafaqsan Qodobka 2-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, qiimaynta cashuuraha waxaa samayn kara oo keliya Wasaaradda Maaliyadda.

(j) **Dakhli ururinta.** Awoodda dakhli ururintu waxay ka kooban tahay awoodda ururinta dhammaan dakhliga Dowlada nuucyadiisa kala duwan, oo ay kamidyihiin canshuuraha, khidmadaha, iyo ganaaxyada. Sida ku cad Qodobka 4-aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda

Guud, 2019 iyo Qodobka 6-aad ee Hagaha Habraaca Qabashada Hawlaha Maareynta Maaliyadda Guud, ururinta dakhliga waxaa fulin kara oo keliya Wasaaradda Maaliyadda.

(x) **Xannibada hantida.** Awoodda xannibbida hantida waxay ka koobantahay xiridda, qufulida, calamaadaynta, xayirada, qaadashada ama ilaalo ka qabashada hanti. Sida ku cad Qodobka 68-aad Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Wasaaradda Maaliyadda oo kaliya ayaa leh awoodda xannibada hanti, si loo dhaqangeliyo shuruucda dakhliga.

(kh) **Samaynta baaritaannada iyo la-wareegista (search and seizure).** Awooda baaritaannada iyo la-wareegista si loo fuliyo sharciyada dakhliga waxay ka kooban tahay baarista guryaha, dhismayaasha, baabuurta, ama meheradaha, ama meel kasta uu Agaasinka Dakhliga u arko daruuri si loo helo caddaymaha la xiriira falalka khatarta ku ah maamulka dakhliga. Sida ku cad Qodobka 99-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Wasaaradda Maaliyadda oo kaliya ayaa awood u leh in ay samayso baaritaannada iyo la-wareegista la xiriirta shuruucda dakhliyada.

(d) **Baarista dambiyada ka dhanka ah sharciyada dakhliga.** Awooddani waxay ka kooban tahay baarista arrin kasta oo muujinaysa in dembi la galay marka la eego sharciga dakhliga. Sida ku cad Qodobka 97(1) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Wasaarada Maaliyada oo kaliya ayaa awood u leh inay baarto dembiyada ka dhanka ah shuruucda dakhliga. Hay'adaha kale waxay baari karaan oo kaliya iyagoo ku saleynaya tixraaca (referral) Wasaaradda Maaliyadda.

(r) **Ganaax u-beddelidda ciqaabaha dembiyada (Compounding of criminal offenses).** Ganaax u-beddelidda ciqaabaha dembiyada (Compounding of criminal offenses) waa hab qofka xadgudubka galay looga ilaalinaayo in dacwad ciqaabeed lagu furo, isagoo fursad loo siinayo inuu bixiyo ganaax. Wasaaradda Maaliyadda oo kaliya ayaa awood u leh inay ganaax u-beddesho ciqaabaha dembiyada si waafaqsan Qodobka 97(3) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019.

(s) **Dalbato macluumaad iyo dukumentiyo la xiriira arrimo dakhli.** Tani waxay ka kooban tahay awoodda looga dalbanaayo shakhsi inuu la wadaago Wasaaradda, macluumaad iyo dukumintiyo kasta oo looga baahan yahay ee lagu go'aaminaayo inuu u hoggaansamay waajibaadkiisa ku xusan shuruucda dakhliyada. Sida ku cad Qodobka 46-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Wasaaradda Maaliyadda oo kaliya ayaa dalban karta macluumaad iyo dukumentiyo ujeeddooyinka laga leeyahay ee tahay dhaqangelinta shuruucda dakhliga.

(sh) Fulinta dhammaan hawlaha kale ee aan kor lagu soo xusin ee hoos yimaada mas'uuliyaddaha maamulka nidaamka dakhliga Dalka.

## CUTUBKA 3-AAD
## DOORKA CIIDANKA TRIBUTARIYADA EE LA XIRIIRTA DHAQAALINTA SHARCIYADA DAKHLIGA

### Qodobka 9-aad
### Mabaadi'da guud ee hagaysa doorka Ciidanka Tributariyada

1. Sida ku cad Qodobka 19-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, marka ay soo codsato Wasaaradda Maaliyaddu, Ciidanka Tributariyada waxa ay ilaalinayaan ama gacan siinayaan

Wasaaradda Maaliyadda iyo Saraakiisha Dakhligu inta ay ku guda jiran dhaqan-gelinta sharciyada dakhliga. Iyagoo u hoggaansamaya kaalmada Wasaaradda Maaliyaddu ka codsatay, Ciidanka Tributariyada waa in ay ku dadaalaan sidii ay u siin lahaayeen Wasaaradda Maaliyadda iyo saraakiisheeda dakhliga kaalmada ay codsadeen. Gacansiinta iyo ilaalinta ay bixinayan Ciidanka Tributariyada waxa kormeeraya Saraakiisha Dakhliga ee uu u xilsaaray Agaasimaha Guud ee Dakhliga, si waafaqsan Qodobka 19-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019.

2. Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyaddu waa in uu taageero weydistaa Ciidanka Tributariyada mar kasta oo ay jirto baahi loo qabo adeegsiga awood ciidan ama ka ilaalinta saraakiisha iyo hantida dakhliga dhibaatooyinka hor istaagi kara maamulka nidaamyada dakhliga. Ciidanka Tributariyadu waa in ay kaalmadan bixiyaan si waafaqsan farqada 1-aad ee Qodobkan.

**Qodobka 10-aad**
**Sugidda amniga xarumaha iyo Saraakiisha Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda**

1. Si waafaqsan Qodobka 9(1)(h) ee Sharciga Dhismaha Ciidanka Booliska, 1972, Ciidanka Tributariyada waa in ay sugaan amniga xarumaha Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda, si looga ilaaliyo saraakiisha dakhliga iyo hantida, khatar kasta oo caqabad ku noqon karta in si hufan loo maamulo nidaamka dakhliga Dalka.

2. Si loo ilaaliyo amniga saraakiisha dakhliga ee fulinaya waajibaadyada loo xilsaaray, Ciidanka Tributariyada waa in ay:

(b) ka ilaaliyaan Saraakiisha Dakhliga ama shakhsiyaadka caawinaya Saraakiisha Dakhliga, xadgudubyada, faragelinta ama carqaladaynta ka dhan ah; iyo

(t) ka hortaggan faragelinta ka dhanka ah hantida dakhliga ee loo isticmaalo maamulka dakhliga.

3. Sida ku cad Qodobka 44(1) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, dhammaan shakhsiyaadka waxaa looga baahan yahay inay u oggolaadan Saraakiisha Dakhliga (iyo kaaliye-yaashooda) ee Wasaaradda Maaliyadda inay si buuxda oo xor ah u galaan goob kasta, ama u helaan dukumeenti, ama hanti kasta oo kale, si ay u gutaan waajibaadkooda la xiriira dhaqan gelinta sharciyada dakhliga. Haddi ay dhacdo in aan loo hoggaansamin codsiyada Saraakiisha Dakhliga, waa in Ciidanka Tributariyada oo adeegsanaya awood macquul ah u fududeeyan Saraakiisha Dakhliga iyo kaaliyayaashooda in ay galaan goobta ama helan dukumintiyada iyo hantida, si waafaqsan Qodobka 44-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019.

**Qodobka 11-aad**
**Sugida amniga inta lagu jiro baarista goobaha**

1. Si waafaqsan Qodobka 99 (2) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, waa in tiro ku filan oo ka mid ah saraakiisha Ciidanka Tributariyada ay la socdaan Saraakiisha Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda marka ay fulinayaan awoodaha baarista goobaha ee ku qeexan Qodobka 99 (2) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, si saraakiisha dakhliga looga ilaaliyo khataraha. Marka loo baahdo, xiritaanka shakhsiyaadka ku lugta leh xadgudubyada ka dhan ah sharciyada dakhliga

waxaa fulinaya Ciidanka Tributariyada, kadib marka ay codsadan sarkiisha dakhliga ee loo xilsaaray.

## Qodobka 13-aad
## Baaritaanka dembiyada ay soo gudbiso Wasaaradda

1. Sida ku cad Qodobka 97(2) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, marka ay Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda uu helo cadaymo muujinaya in dambi laga galay shuruucda dakhliga, waa in Agaasinku qoraal ku ogaysiisaa Ciidanka Tributariyada iyo Xeer Ilaaliyaha Guud. Si waafaqsan Qodobka 9 (1) (f) ee Sharciga Dhismaha Ciidanka Booliska, 1972, Ciidanka Tributariyadu oo si dhaw ula shaqeynaya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waa inuu baara fal dembiyeedka xogtiisa loo soo gudbiyay.

2. Baaritaanka ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkaan lama sameyn karo, haddii Wasaaradda Maaliyaddu ay ganaax u-beddesho ciqaabaha fal dembiyeedka sida uu dhigayo Qodobka 97(3) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019. Haddii go'aanka Wasaaraddu ee ku salaysan Qodobka 97(3) ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, la soo saaro ka dib marka uu baaritaanku bilaabmo, waa in si degdeg ah baaritaankaas loo joojiyo.

## Qodobka 14-aad
## Dhaqan-Galka

1. Xeer-nidaamiyahan waxa uu dhaqan gelayaa ka dib marka uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda.

2. Nuqulka saxiixan ee Xeer-nidaamiyahan waa in lagu daabaca bogga internetka ee Wasaaradda.

09/12/2023

**Xil. Biixi Iimaan Cige**
**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**
**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**